# MFIP: Waxbarashada iyo Tababarka

MFIP: Education and Training

## Manfaca MFIP ka iyo Shaqada

Inta badan waalidiinta qaata MFIP waa in ay shaqo raadiyaan oo shaqeeyaan. Haddii aad dooneyso waxbarasho iyo tababar dheeraad ah, waxaa suurogal ah in aad heli karto. Waa in aad weydiisaa waxa aad dooneyso oo la timaadaa qorshe wanaagsan. Akhri xogtan urursan oo la soo xiriir xafiiska gargaarka sharciga si laguu caawiyo.



## Qiimeynta Shaqada ee MFIP

Marka laguu bilaabo MFIP, waxa aad la kulantaa la taliyaha shaqaaleynta si uu sameeyo "qiimeyn." Taasi waxa ay ka dhigan tahay ururinta macluumaadka sida aad shaqo ku heli karto una heyn karto. La taliyaha shaqaaleynta waxa uu eegaa aqoontaada, taariikhdaada shaqada, xirfadahaaga, iyo suuqa shaqada si aad u hesho "shaqo kugu haboon." Shaqo kugu haboon oo ugu yaraan ku siisa lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyo, oo amaan iyo nadiif ah, oo aad ka bixi karto.

La taliyaha shaqaaleynta waxa kale oo uu ku weydiinayaa heynta caruurta iyo gaadiidka aad u baahan tahay iyo haddii ay jiraan waxyaabo shaqsi ah ama qoyska ah oo laga yaabo in ay kaa hor istaagi karaan helitaanka iyo heynta shaqada, oo ay ka mid tahay dagaalka qoyska dhex mara.

La taliyaha shaqaaleynta waxa uu ku weydiin doonaa haddii aad dooneyso in aad dhameystirto shahaadooyinka ama leesinka xirfadaha. Haddii ay taasi jirto, waa in ay qeyb ka noqotaa qorshahaaga shaqada.

La socodsii la taliyahaaga shaqada haddii aad madaxa ka jiran tahay, isticmaalka maandooriyayaasha, ama baahi gaar ah ee waxbarashada oo laga yaabo in ay kaa hor istaagaan in aad shaqo hesho ama aad heyso shaqada.

## Fasalada Barashada Afka Ingiriisiga (ESL)

La socodsii la taliayahaaga shaaqaaleynta haddii aadan buuxsan karin codsiyada ku qoran afka Ingirisiiga, ka qeyb qaadan ka rin wareysiyada shaqada, ama raaci karin tilmaamaha shaqada. Waxa ay kaa qadayaan imtixaan afka Ingiriisga ah. Haddii ay aqoontaada afka Ingiriisiga ka hooseyso heerka (SPL6), waxa aad qaadan kartaa fasalada barshada Afka Ingiriisga ee ESL ilaa aad ka gaarto heerka SPL6. Majirto xilli u go'an ama saacado u go'an in aad qaadato fasalada. Waad isku geyn kartaa saacadaha shaqada iyo fasalada haddii aad dooneyso. La taliyahaaga xagga shaqada ayaa qiimeynaya horumarka aad sameyneyso 3dii bilood ee kasta.

Waxaa jira laba heer ee fasalada ESLka.

- **Fasalada Heerka Ku shaqeynta Luqadda** Fasaladan waxaa lagu bartaa sida shaqo lagu helo oo shaqada loo hayo. Waa fasalo ugu yaraan 20 saacadood todobaadkii ah. La taliyahaaga shaqaaleynta ayaa kaa diiwaangelinaya fasalo degdeg ah haddii la heli karo.

- **Fasalada Caadiga ah ee ESLka.** fasaladan waxa ay kaa caawiyaan ku hadalka, qoraalka, iyo akhriska afka Ingirisiiga.

## Waalidka Da'Doo Ka Tahay 20 Jir Ee Dugsiga Sare & GED

Haddii aad ka yar 18 jir, inta badan waa in aad dhigataa dugsiga ilaa aad ka qaato shahaada dugsiga sare ama GED. Haddii aad tahay 18 ama 19 jir oo aadan heysan shahaadada dugsiga sare ama GED waxa aad dooran kartaa in aad shaqeyso ama dugsiga aado. Haddii aad doorato dugsiga, bilaha laguma tirinayo 60ka bilood ee xadka u go'an. Haddii aad shaqo doorato, waa lagu tirinayaa.

## Dugsiga Sare, GED, Waxbarashada Aasaasiga Ah ee Dadka Waaweyn (ABE) ee Waalidiinta 20 jirka ah ama ka weyn

Haddii aadan heysan shahaadada dugsiga sare, GED, ama shahaadada dugsiga sare ee dadka waaweyn, waxa aad qaadan kartaa maadooyinka Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Aasaasiga Ah. Waajib kuguma ah in aad heer ka gaaro mana jiraan xad u go'an saacadaha aad dugsiga dhigan karto. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aad dooran karto in dhamaan saacadah qorshaha shaqaaleynta aad ka dhigato saacado waxbarasho. La taliyahaaga xagga shaqada ayaa qiimeynaya horumarka aad sameyneyso 3dii bilood ee kasta.



## Waxbarashada Dugsiga Sare Ka Sareysa

Sharciyada u degsan tababarka iyo waxbarashada ka sareysa dugsiga sare waa kuwo isbedelay sanadihiii la soo dhaafay. Halkan waxaa ku xusan sharciyada iminka dhaqangalka ah:

- Waxa aad iska diiwaan gelin kartaa tababar ama waxbarasho ka sareysa dugsiga sare oo qaadaneysa ilaa 4 sano. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aad dhameysan karto waxbarasho jaamacadeed oo 4 sano adiga oo MFIP qaadanaya.

- Lagaama doonayo in aad ku darto hawl kale oo dheeraad ah qorshahaaga. Waqtigaaga oo dhan waxa aad ku bixin kartaa waxbarashadaada.

- La taliyahaaga xagga shaqada ayaa dib u eegaya xaaladaada 3dii bilood hal si uu u hubiyo in aad horumar ku talaabsaneyso.

- Waxaa lagaa doonayaa in aad kala hadasho qorshahaaga waxbarashada la taliyahaaga xagga shaqada, laakiin khasab ma aha in la taliyahaaga xagga shaqada uu ogolaado waxbarashadaada ama tababarkaaga.  La taliyahaaga xagga shaqada ayaa kaa caawinaya sida aad ku heli karto macluumaadka, talada aad dooneyso ee la xiriirtamustaqbalka shaqada ee waxbarashadaada, ka soo bixidda shuruudaha ku xiran ogolaashaha jaamacadda iyo meelaha uu ku wanaagsan yahay ama ku liito aqoonta aad baraneyso.

- Waajib kuguma ah in uu la taliyahaaga ra'yi ku darsado haddii aad ka qeyb qaadaneyso barnaamij la aqoonsan yahay, tababar soconaya wax ka badan 12 bilood ama sanadka ugu dambeeya ee waxbarashada ka sareysa dusgiga sare ama barnaamij soconaya wax ka badan 1 sano.



- Ka dib marka aad dhameysato tababarka ama waxbarashada, waxaa lagu siinayaa 12 todobaad aad shaqo ku hesho. Haddii aadan shaqo ku helin aqoontii aad soo baratay, waa in aad shaqo ku raadisaa waxyaabaha kale ee aad qaban karto. Ama waxa aad la kulmi kartaa la taliyahaaga shaqaaleynta si uu wax uga bedelo qorshahaaga shaqada oo uu ku daro shaqo raadinta.

Dhamaan fursadaha waxbarashada, waxa aad u adeegsan kartaa saacad barasho ah saacad kasta oo aad fasalka ka qeyb qaadato. Macalinkaaga waa inuu ogolaada in waqtiga aad codsaneyso uu yahay mid macquul ah.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**